

## U CODEE SIDA ISWIIDHAN U WANAAGSAN

**Marka uu adduunku qasan yahay, waxaa muhiim ah in laga fiirsado cidda kalsoonida la siin karo. Cidda mas'uuliyad qaadi karta ee ku adkaysan karta. Cidda ku dadaalaysa sida dalka oo dhan u wanaagsan.**

Waxaannu aaminsannahay xorriyadda ay dadka oo dhami u leeyihiin in ay wax doortaan oo ay yeeshaan awoodda go'aammadooda. Waxaannu aaminsannahay cashuur yar iyo ganacsi badan. Waxaannu aaminsannahay sinnaanta dadkoo dhan qiimahooda. Weligayo kama leexleexanno marka ay arrintu qusayso madaxbannaanida dawladda qaynuun-raaca ah iyo mabda'a ah in dhammaan loo siman yahay sharciga. Waxaannu u halgamaynaa in dumarku helaan fursadaha ragga oo kale. Waa in aad jeclaato qofkii aad doonto- oo aanad ka cabsan in aad muujisato. Waxaanu ognahay in ay hadda taagan tahay mushkilad cimilo, waxaanannu doonaynaa in aannu wax kaga qabanno badinta shidaalka laga sameeyo tamarta la cusboonayn karo iyo in ay guryuhu helaan koronto deegaanka u fiican. Tani waa siyaasad u fiican ah Iswiidhan.

Ma rabtaa sida u wanaagsan dalka oo dhan?

**U codee xisbiga Centerpartiet!**



# SIDA ISWIIDHAN U WANAAGSAN

**Hal cod oo la siiyo Centerpartiet  
Waa hal cod la siiyey, sida u wanaagsan Iswiidhan.**



# Ku socota, adigaaga Iswiidhan la raba sida u wanaagsan.

Iswiidhan iyo adduunkaba, waxaa ka jira dhibaatooyin badan oo waaweyn oo xal u baahan. Laba jid uun baa furan. Ama waa wada shaqayn dheeraad ah iyo xilkasnimo ku qotonta bartamaha siyaasadda Iswiidhan oo si weyn xoogga u saaraysa cimilada, sinnaanta ragga iyo dumarka iyo dalkoo dhan. Ama waa in fursad saamayneed oo weyn la siiyo xoogagga fursad sugayaasha ah ee ku suntan aaminaad la'aan, eedayn iyo isku dhinac u jeed. Waddadee ayaad u malaynaysaa in ay u fiicantahay Iswiidhan?

Xisbiga Centerpartiet wuxu u jiraa adigaaga danaynaya dhibaatooyinka dhabta ah ee nololmaalmeedka la xiriira - oo raba in uu wax ka qabto.

Oo raba in uu wax ka qabto isbeddellada cimilada inta aan la habsaamin.

Oo raba inuu arko shaqooyin iyo shirkado badan oo dalkoo dhan ka jira oo aan ku koobnayn magaalooyinka waaweyn.

Oo raba in uu joojiyo dagaalka raggu kula kaco dumarka.

Oo raba in bulshadu wax badan ka qabato sidii loo sixi kagaa caafimaad darrada maskaxeed ee carruurta.

Oo qaba in ay waajib Bina-Aadannimo ku tahay Iswiidhan -sida waddamada kale-, in ay caawiso dadka ka soo qaxay dagaallada.

Oo qaba in aynu u baahannay wada shaqayn badan oo aan yarayn.

Oo raba sida u wanaagsan Iswiidhan.

Dooro xisbi cagaaran oo libaraal ah oo raba in Iswiidhan sida u wanaagsan laga wada shaqeeyo – Dooro xisbiga Centerpartiet!

## CIMILADA, SINNAANTA IYO BAADIYAHA DARTOOD

### SIDA CIMILADA U FIICAN DARTEED

Dib u qaabaynta cimiladu wuxuu u baahan yahay in uu dhakhso u socdo. Iswiidhan way kartaa, waana inay horseed u noqotaa. Waa in aynu dhinno qaaca hawada oo aynu si weyn xoogga u saarno shaqooyin cusub oo cagaaran.

- Xoog u yaree qaaca hawada
- Xoogga saar cunto deegaanka laga soo saaro, cimilada darteed
- Ku dhakhso dhismaha tamarta la cusboonayn karo

### SIDA SINNAANTA U FIICAN DARTEED

Ragga iyo dumarku waa in ay helaan fursado isku mid ah. Sidaa darteed waa in mushaharka dumarku kordho lana burburiyo saqafyo badan oo dhalo ah.

- Waa in ay ka nabadgalaan u xoogsheegasho dhammaan dumarka iyo carruurta
- Waa in dalka oo dhan laga abuuro caafimaad sinnaan leh - oo leh daryeelka ummulidda oo heer caalami ah
- Waa in xoogga la saaro sinnaanta mushaharrada, lana kordhiyo ganacsiga dumarka

### SIDA BAADIYAHA U FIICAN DARTEED

Baadiyuhu wuxuu dhisayaa Iswiidhan. Dalka oo dhan. Halkaa waxaa ka jira fursado lagu abuurayo shaqooyin cusub, wax soo saarkeenna cunto iyo shidaalka la cusboonayn karo.

- Waa in la fududeeyo samaynta iyo wadidda shirkadaha, taas oo shaqooyin ka abuuraysa Iswiidhan oo dhan oo aan ku koobnayn magaalooyinka waaweyn
- Waa in lagu dadaalo in ay waddanka oo dhan ka jiraan jidad fiicfiican, waddooyinka xadiidka iyo internet
- Waa in la fududeeyo dhismaha iyo degidda baadiyaha